TAKHAATIIRTA
J A A M A C A D D A
M I N N E S O T A

Ogeysiiska Dhaqangelinta Waxa Qofka u Gaarka ah

OGEYSIISKAAN WUXUU SHARRAXAYAA SIDA WARARKA CAAFIMAADKA EE ADIGA KUGU SAABSAN LAGA YAABO IN LOO ISTICMAALO SHAACANA LOOGA QAADO IYO SIDA AAD AWOOD UGU HELEYSID WARARKAAN.

FADLAN SI TAXADDAR LEH DIB UGU EEG.

Wuxuu dhaqangelayaa: Disembar 1, 2005

YAAN NAHAY MAXAYSE WAAJIBAADYADEENNA SHARCIGA AH ADIGA KUU YIHIIN

Takhaatiirta Jaamacadda Minnesota waxay bixiyaan daryeel caafimaad oo loogu talogalay adeegyada bukaanka dibedda iyadoo loo marinayo shakhsiyaad kala duwan oo kala gaar ah, laakiin sharci ahaan isla xiriira. Iyadoo loogu talogalay ujeeddooyinka soo socda ee sharciyada waxa qofka u gaarka ah ee dowladda dhexe ee soo socda, dhammaan Takhaatiirta Jaamacadda Minnesota waxaa loo aqoonsan yahay iney hal uun "axadka la gaarsiiyey" isla markaana waxaan raacayaa shuruudaha Ogeysiiskaan. Tusaale ahaan, bukaanka waxaa laga yaabaa marka ugu horreysa in lagu arko shaybaarka asaasiga ah Takhaatiirta Jaamacadda Minnesota, laakiin ka dibna waxaa loo diraa sharbaarka gaarka ah ee Takhaatiirta Jaamacadda Minnesota. Waxaan wadaagnaa wararka u dhexeeya qaybo kala duwan ee habka si gacan looga geysto xaqiijinta daryeelka waafi ah oo wanaagsan ee loogu talogalay bukaanka. Dhammaan afarta shaqaale, mutadawiciinta, iyo wakiilladu waxay u hoggaansami doonaan shuruudaha Ogeysiiskaan. Waxaa sii dheer, Takhaatiirta Jaamacadda Minnesota iyo Jaamacadda Minnesota waxay si wadajir ah uga qayb qaadan doonaan sharraxaadda ardayda caafimaadka isla markaana ugu hawlgeli doonaan hawlo cilmi baarineed iyo mid waxbarasheed oo wadajira. Iyadoo lagu joogo hawlaha wadajira ee noocaas ah, Takhaatiirta Jaamacadda Minnesota waxay laga yaabaa iney wararkaaga caafimaadka la wadaagaan Jaamacadda Minnesota, isla markaana Jaamacadda Minnesota waxaa khasab ku ahaan doonta waxyaabaha looga baahan yahay ee ku qoran Ogeysiiska ee la xiriira wadaagidda wararka noocaas ah.

Haddii aad adeeg ku heshid tas-hiilaadka Takhaatiirta Jaamacadda Minnesota kaasoo ka yimid bixiyaha daryeelkaaga caafimaad kaasoo aan xubin ka ahayn shaqaalaha Takhaatiirta Jaamacadda Minnesota, bixiyaha daryeelkaas caafimaad waxaa looga baahan doonaa inuu raaco shuruudaha Ogeysiiskaan ee la xiriira adeegyadaas. Si kasta ha ahaatee, bixiyahaas daryeelka caafimaadka waxaa laga yaabaa inuu leeyahay siyaasado ka duwan ama ogeysiisyo la xiriira isticmaalkooda iyo shaac ka qaadidda wararka caafimaadka taasoo lagu abuuray xafiiskooda ama shaybaarkooda.

WARAR CAAFIMAADKA EE GAARO OGEYSIISKAAN

Wararka caafimaadka shakhsi ahaaneed ama wararka caafimaadka waa war aan abuurno ama helno kaasoo adiga ku sheegaya ama kula xiriirinaya xaaladdaada caafimaad ee jidh ahaaneed ama maskax ahaaneed ee waxaad soo martay, waxa hadda ay tahay, ama mustaqbalka; daryeelka caafimaad ee lagu siiyo; ama lacagta lagu siiyey ee la soo dhaafay, tan la joogo iyo tan mustaqbalka ee loogu talogalay daryeelka caafimaadka adiga laguu qabtay.

BALLANQAADKEENNA LA XIRIIRA WARARKA CAAFIMAADKA

Waxaan fahamsannahay in wararka caafimaadka adiga kugu saabsan ay yihiin wax shakhsi ahaaneed. Waxaa naga go'an dhowridda khaas ahaanta wararkaaga caafimaadka annagoo u hoggaansameyna dhammaan sharciyada kalsoonida wax qofka u gaarka ee dowladda dhexe iyo kuwa gobolka ee la meel mariyey.

Wuxuu sharcigu nooga baahan yahay ku sugnaanta gaar ahaanta wararkaaga caafimaadka iyo inaan ku siinno Ogeysiiska ku saabsan hababka laga yaabo inaan u isticmaalno ama shaaca uga qaadno wararka caafimaadka adiga kugu saabsan, waajibaadyada sharci ahaaneed ee na saaran iyo dhaqangelinta waxa kuu gaarka ah, iyo xuquuqdaada waxa kuu gaarka ah.

SIDEE LAGA YAABAA INAAN U ISTICMAALNO SHAACANA UGA QAADNO WARARKA CAAFIMAADKA ADIGA KUGU SAABSAN

Ku saleynada soo socda waxay sharraxayaan habab kala duwan ee laga yaabo inaan u isticmaalno shaacana uga qaadno wararka caafimaadka kugu saabsan. Ku saleysnaan kasta ee isticmaalid ama shaac ka qaadidyo waan sharraxaynaa waxa aan ula jeedno waxaanan bixineynaa tusaale. Maahan inaan taxayno isticmaalid ama shaac ka qaadid kasta; si kasta ha ahaatee, dhammaan hababka naloo oggolyahay inaan u isticmaalno shaacana uga qaadno wararka iyadoo laga duulayo sharciga dowladda dhexe wuxuu ku dhacayaa mid ka mid ah ku saleysnaanta. Marka laga reebo xaalado gaar ah oo xaddidan sida marka ay deg deg dhacdo, sharciga Minnesota wuxuuna nooga baahan yahay inaan la imaanno oggolaansho qoraal ah ka hor inta aannaan diiwaannadaada caawimaadka siin qayb seddexaad.

Daaweynta: Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno wararka caafimaadka adiga kugu saabsan si aan kuu siinno daaweyn caafimaad ama adeegyo. Waxaa laga yaabaa inaan wararka caafimaadka adiga kugu saabsan shaaca uga qaadno takhaatiirta, kalkaaliyeyaasha, farsamoyaqaannada, ardayda caafimaadka, ama saraakiisha kale ee ku hawlan daryeeliddaada. Waaxaha kala duwan ee tas-hiilaadkaan waxaa laga yaabaa iney la wadaagaan wararkaaga caafimaadka isku duwid daryeel, sida daawo qorid, shaqo shaybaar, iyo raajada. Waxaa kaloo laga yaabaa inaan wararka caafimaadka adiga kugu saabsan shaaca uga qaadno takhasusleyaasha lagala tashaday daaweyntaada ama daryeelka. Sidoo kale waa dhaqankeenna inaan siinno wararka ku saabsan daryeelka iyo daaweynta aan siinno takhtarka ku soo diray ee diiwaanka si markaas isaga ama iyadu ay u helaan warar ku habboon oo loogu talogalay in daryeel lagugu siiyo mustaqbalka.

Lacag bixinta: Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno wararka caafimaadka adiga kugu saabsan si aan u helno lacag bixinta loogu taloglay adeegyada. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaan wararka caafimaadkaaga siinno qorshahaaga caafimaadka oo ay la jirto wararka ku saabsan wixii qalliin ah ee lagugu sameeyey si markaas qorshahaaga caafimaadku uu noo siiyo lacagta ama ay dib kuu siiyaan lacagtii kaaga baxday booqashada shaybaarka. Waxaa kaloo laga yaabaa inaan kuu sheegno qorshaha caafimaadka ku saabsan daaweynta kuu socota si aan u helno oggolaansho ka sii horreeya ama aan u go'aansanno inuu qorshahaaga caafimaadku daboolayo daaweynta.

Hawlaha Daryeelka Caafimaadka: Waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno ama shaaca uga qaadno wararka caafimaadka adiga kugu saabsan hawlaha daryeelka caafiamadka. Isticmaalladaan iyo shaac ka qaadiddaan waxay lagama maarmaan u yihiin si loo hawlgeliyo tas-hiilaadkeenna iyo in la xaqiijiyo in dhammaan bukaannadeennu ay helaan daryeel tayo leh. Tusaale ahaan, Waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno ama shaaca ka qaadno wararka caafimaadka adiga kugu saabsan si aan u sameyno qiimeyn tayo leh iyo hawlo kor u qaadid, si aan meesha u soo gelinno isku duwid daryeel ama maamulid arrin, ama u maamulno hawlaheenna. Waxaa laga yaabaa inaan shaaca uga qaadno wararkaaga caafimaadka hawlaha daryeelka caafimaadka ee bixiye kale ama qorshe caafimaad iyadoo laga duulayo xaalado xaddidan. Waxaa sii dheer, xiriirka hoose ee aan la leennahay Jaamacadda Minnesota awgeed, waxaan la wadaagnaa hawlgallada daryeelka caafimaadka qaarkood, isla markaana iyadoo la xiriirta hawlgalkaan wadajirka ah, waxaa laga yaabaa inaan Jaamacadda Minneesota shaaca uga qaadno wararka caafimaadka.

Xusuusiyeyaasha Ballanta: Waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno ama shaaca ka qaadno wararka caafimaadka si aan kuula soo xiriirno iyadoo ah xusuusinta inaad ballan daaweyn ama daryeel caafimaad leedahay.

Daaweyn ku Doorsasho: Waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno ama shaaca ka qaadno wararka caafimaadka si aan kuugu sheegno ama kuugu dardaaranno doorrimaadyada daaweyn suuragal ah ama wax lagu doorsado ee laga yaabo inaad xiiseyso.

Adeegyada iyo Manfacyada Caafimaadka la Xiriira: Waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno aanna shaaca ka qaadno wararka caafimaadka si aan kuugu sheegno manfacyada la xiriira caafimaadka ama adeegyada laga yaabo inaad daneyneyso.

Shakhsiyaadka Lugta ku leh Daryeelkaaga ama Lacag Bixinta Daryeelkaaga: Waxaa laga yaabaa inaan wararka caafimaadka shaaca uga qaadno xubin qoyska ka tirsan, saaxiib ama kuwa kale ee lugta ku leh daryeelkaaga. Haddii aadan awoodin inaad oggolaatid, taag darri ku haysa awgeed ama xaalad deg deg awgeed, ama aadan joogin waxaa markaa laga yaabaa inaan wararka caafimaadkaaga shaaca ka qaadno haddii aan dareenno iney dantaadu ku jirto. Waxaa laga yaabaa inaan wararka caafimaadkaaga shaaca uga qaadno ururka samafalka masiibooyinka haddii ay masiibo dhacdo, si markaas qoyskaaga loo aqoonsado.

Cilmi baaris: Innagoo sameyneyna cilmi baaris, waxaan baranaynaa habab cusub oo ka wanaagsan kuwii hore oo aan taxliilinno aanna ku daweyno cudurka. Waxaa laga yaabaa inaan shaaca uga qaadno wararka caafimaadkaaga cilmi baareyaasha gudaha marka cilmi baaristooda ay oggolaato guddiga hay'adeed ee dib u eegistu kaasoo dib u eegay soo jeedinta cilmi baarista isla markaana meel dhigay maamuuska si loo xaqiijiyo khaas ahaanta wararka caafimaadkaaga. Waxaa laga yaabaa inaan oggolaanno in cilmi baareyaasha gudaha ee diyaarinaya iney cilmi baaris sameeyaan ay galaangal u yeeshaan wararka caafimaadkaaga. Xaaladaha qaarkood, sharciga Minnesota wuxuu u baahan yahay oggolaanshadaada ka hor inta aan shaaca looga qaadin cilmi baareyaasha dibedda. Haddii aad ka qayb qaadatid mashruuc cilmi baarineed oo khuseeya daaweyn, xuquuqdaada galaangal u yeelasho ee wararka caafimaadka la xiriira daaweyntaas waxaa laga yaabaa in si ku meel gaar ah loo xaddido si loo dhowro isu dhammaanta cilmi baarista.

Maaliyad dalbid: Takhaatiirta Jaamacadda Minnesota iyo Jaamacadda Minnesota ayaa laga yaabaa iney isticmaalaan ayna bixiyaan qaar wararkaaga ka mid ah si ay kaala soo xiriiraan wax ku saabsan dalbid lacageed si ay u taageeraan hawshooda. Labada ururba waxay isticmaali doonaan ama bixin doonaan oo keliya warar shakhsi ahaaneed sida magacaaga, cinwaankaaga, iyo wararka la xiriiridda iyo taariikhaha aad daryeelka heshay. Xiriirradani waxaa laga yaabaa iney ku yimaadaan Aasaaska Caafimaadka Minnesota. Haddii lagula so oxiriiro, waxaad dooran kartaa inaan mustaqbalka danbe lagaala soo xiriirin maaliyad dalbid. Wixii xiriir maaliyad dalbid ah ee aad heshid waxaa ku jiri doona sharraxaadyada sharraxaya sida aad u "u kala dooraneyso" marka xiriirro kale ku soo gaaraan. Waxaad kaloo warqadu qori kartaa Maamulka Waxa Qofka u gaarka ah ee Takhaatiirta Jaamacadda Minneesota uguna qor cinwaanka la taxay kana codso inaan lagula soo xiriirin.

Isticmaallada iyo Shaac ka Qaadidda aad Si Gaar ah u Sharciyeysid: Waxaan ka ahayn waxa lagu sharraxay Ogeysiiskaan, isticmaallada iyo shaaca ka qaadidda wararka caafimaadkaaga waxaa la sameyn doonaa oo keliya markaad adigu oggolaatid. Waad ka noqon kartaa oggolaanshadaada waqti kasta ee isticmaalid mustaqbal iyo shaac ka qaadidba adigoo soo gudbinaya ka noqosho qoraal ah taasoo diideysa shaac ka qaadidda. Si kasta ha ahaatee, ma awoodno inaan dib ula noqonno wixii shaac ka qaadid ah ee aan horay u sameynay innagoo oggolaanshadaada haysanna. Oggolaanshadaada qoraalka ah la'aanteed, ma isticmaali doonno ama shaaca kama qaadi doonno wararka caafimaadkaaga sabab kasta oo ay noqotaba marka laga reebo kuwa lagu sharraxay Ogeysiiska.

Sida uu Sharcigu u Baahan yahay: Waxaan shaaca ka qaadi doonnaa wararka caafimaadkaaga marka ay sidaa u baahato dowladda dhexe, midda gobolka, ama sharciga deegaanku.

XAALADAHA GAARKA AH

Waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno aanna shaaca uga qaadno wararka caafimaadka oggolaanshadaada la'aanteed:

- Iyadoo loogu talogalay hawlaha caafimaadka dadweynaha sida uu sharcigu oggolyahay ama u baahan yahayba. Tusaale ahaan, si loo soo tebiyo cudur soo baxay iyo tiro koob, dhalasho iyo dhimasho, wax u dhimid ama dayicid, fal celin daaweyn iyo mashaakillada daawada.
- Iyadoo ku socota hay'adda dusha ka eegidda caafimaadka oo loogu talogalay hawlaha uu sharcigu oggolaaday. Tusaaleyaasha hawlaha dusha ka eegidda waxaa ku jira xisaab xirka, baaritaanka, kormeerka iyo shati siinta. Hawlahaan waxay lagama maarmaan u yihiin in dowladdu ay isha ku hayso habka daryeelka caafimaadka, barnaamijyada dowladda iyo u hoggaansanka sharciyada xuquuqda rayidka.
- Iyadoo loogu talogalay sharciyada ama qaababka maamullada, sida ka jawaabidda amarka maxkamadda.
- Iyadoo loogu talogalay ujeeddooyinka meel marinta sharciga sida uu oggolyahay ama uu u baahan yahay sharcigu ama iyadoo looga jawaabayo digniin baarid ama amar maxkamadeed.
- Si looga fogaado khatar weyn oo soo gaarta caafimaadkaaga ama ammaankaaga ama caafimaadka iyo ammaanka dadweynaha ama qof kale.
- Isagoo ku socda baareyaasha dhimashada, imtixaaneyaasha caafimaadka iyo isku duweyaasha tacsida ee la xiriira qof dhintay. Waxaa laga yaabaa iney tani lagama maarmaan noqoto tusaale ahaan, si loo aqoonsado qof dhintay ama go'aan looga gaaro sababta dhimasho. Waxaa laga yaabaa inaan wararka caafimaadka shaaca uga qaadno isku duweyaasha tacsida sida uu sharcigu oggolyahay si awood loogu siiyo iney hawlahooda qabsadaan.
- Iyadoo loogu talogalay raadinta xubin iyo yaboohidda xubin si kaalmo looga geysto yaboohidda xubinta ama unugga iyo ku beeriddiisa iyadoo daba socota sharciga ku dabbaqmaya.
- Iyadoo loogu talogalay shaqooyinka dowladda ee gaarka ah, sida shaac ka qaadidda loo sameynayo saraakiisha dowladda dhexe iyadoo loogu talogalay hawlaha ammaanka qaranka.
- Iyadoo loogu talogalay magdhowga shaqaalaha iyo barnaamijyada la xiriira ee loogu talogalay dhaawacyada shaqada la xirira ama jirro.
- Haddii aad xubin ka tahay ciidammada qalabka sida, si loo hagaajiyo mas'uuliyiinta amarka militariga sida loo baahan yahay.
- Haddii aad tahay mid ku nool machad dhaqan celineed ama xabsi ugu jirtid sarkaalka dhaqangelinta sharciga, ee ku socota machad dhaqan celineed ama sarkaalka dhaqangelinta sharciga sida uu sharcigu oggolyahay, tusaale ahaan, sida lagama maarmaanka u ah caafimaadkaaga iyo ammaankaaga iyo caafimaadka iyo ammaanka kuwa kale.

XUQUUQDAADA LA XIRIIRTA WARARKA CAAFIMAADKA ADIGA KUGU SAABSAN

Xuquuqdaada la xiriirta wararka caafimaadkaaga waxaa lagu sharraxay qaybtaan. Si aad u isticmaashid wax kastoo ka mid ah xuquuqahaan waa inaad soo gudbisaa codsi qoraal ah. Foomamka lagu codsanayo mid kasta oo ka mid ah kuwa soo socda waxaa laga heli karaa goob kasta oo dhaqangelineed ama waxaa laga heli karaa Maamulka Waxa Qofka u Gaarka ee Takhaatiirta Jaamcadda Minnesota ee cinwaanka taxan. Foomamka waxaa ku jira wararka lagama maarmaanka u ah inaan wax ka qabanno codsigaaga.

Waxaad leedahay xuquuqaha soo socda ee la xiriira wararka caafimaadkaaga ee aan kuu xafidno:

Awood u Yeelasho: Waxaad xaq u leedahay inaad eegto ama aad qaadato nuqulka wararka caafimaadkaaga, iyadoo ay jirto ka reebid xaddidan. Haddii aad codsatid nuqullo, waxaan kaa qaadi doonnaa lacag si aan ugu daboolno qiimayowga sawiridda, boost soo dhigidda iyo qalabka kale. Xaalado aad u xaddidan ayaa laga yaabaa inaan diidno codsigaaga. Haddii aan diidno codsigaaga, waxaa laga yaabaa in awood laguu siiyo in dib loo eego diidmada.

Wax ka beddelid: Haddii aad dareensan tahay in wararka caafimaadkaagu ay khaldan yihiin ama wax ka maqan yihiin, waxaad xaq u leedahay inaad codsatid in wax laga beddelo. Waxaa laga yaabaa inaan diidno codsigaaga haddii aannaan abuurin wararka aad dooneysid in la beddelo ama sababo kale awgood. Haddii aan diidno codsigaaga, waxaan ku siin doonnaa sharraxaad qoraal ah. Waxaad ku jawaabi kartaa bayaan aad kaga soo horjeeddo si loogu daro diiwaannadaada.

Mas'uul ka noqoshada Shaac ka Qaadidda: Waxaad xaq u leedahay inaad heshid taxanaha shaac ka qaadidda aan ku sameynay wararka caafimaadkaaga. Xuquuqdaani kuma dabbaqmeyso shaac ka qaadidda daaweynta, lacag bixinta, hawlgallada daryeelka caafimaadka iyo ujeeddooyin kale oo dhowr ah. Haddii aad codsatid taxanaha in ka badan mar muddo 12 bilood gudahood ah, waxaa laga yaabaa inaan qiime macquul ah kaaga qaadno, lacag ku saleysan qiimaha. Codsigaagu waa inuu tilmaamaa muddada waqtiga, taasoo aan ahayn mid ka dheer lix sanadood ama ku soo dartaa waqti kasta oo ka horreeya Abriil 14, 2003.

Codsiga Xannibidda: Waxaad xaq u leedahay inaad codsatid inaan xannibid dul dhigno isticmaalkeenna ama shaac ka qaadidda wararka caafimaadkaga iyadoo loogu talogalay daaweyn, lacag bixin ama hawlgallada daryeelka caafimaadka. Nalookama baahna inaan oggolaanno xannibaadahaan,laakiin haddii aan sidaa yeelno, waxaan adeeci doonnaa heshiiska aan galnay (marka laga reebo wixii deg deg ah).

Xiriirka Kalsoonida leh: Waxaad xaq u leedahay inaad codsatid inaan si kalsooni leh kaagala soo xiriirno wararka caafimaadkaaga iyadoo la isticmaalayo habab kale ama goob kale. Tusaale ahaan, waxaad weydiisan kartaa inaan kaala soo xiriirno oo keliya shaqada ama aan kugula soo xiriirno warqad. Waan soo dhaweyneynaa dhammaan codsiyada macquulka ah.

Kuwa kale ee Adiga ku Matalaya: Xuquuqahaan ayaa iyagana isticmaali karaan dadka kale xuquuqda sharciga ah u leh iney adiga ku matalaan.

Xuquuqda Nuqulka Warqad Ogeysiiskaan ah: Waxaad xaq u leedahay nuqul warqad Ogeysiiskaan ah waqti kasta xitaa haddii aad oggolaatay inaad Ogeysiiskaan ku heshid si elektarooni ah. Waxaad nuqulka Ogeysiiskaan ka heli kartaa website-keenna, www.umphysicians.umn.edu. Si aad u heshid nuqul warqad ee Ogeysiiskaan, waxaad nuqul ka codsan kartaa mid kasta oo ka mid ah goobaha hawlgalladeenna ama adigoo u qoraya warqad Maamulka Waxa Qofka u Gaarka ah uguna hagaajinaya cinwaanka taxanka.

BEDDELIDDA OGEYSIISKAAN

Waxaa nalooka baahan yahay inaan u hoggaansanno shuruudaha Ogeysiiskeenna ku Dhaqanka Waxa Qofka u Gaarka ah ee hadda dhaqan gashan. Waxaan la haraynaa xuquuqda inaan beddelno ku dhaqankeenna waxa qofka u gaarka iyo shuruudaha Ogeysiiskaan waqti kasta, iyo inaan beddeladdaas ku dhaqan gelinno dhammaan wararka aan hayno, marka lagu daro wararka caafimaadka aan abuurnay ama aan helnay wixii ka horreeyey taariikhda dhaqangelinta Ogeysiiska cusub. Marka laga reebo goorta uu sharcigu u baahdo, wixii beddelid la taaban karo ah ee ku dhaca ku dhaqankeenna waxa qofka u gaarka ah la meel marin maayo ka hor taariikhda dhaqangelinta Ogeysiiska cusub. Waxaan tas-hiilaad kasta ku dhejin doonnaa nuqulka Ogeysiiska hadda jira waxaan kaloo ku qori doonnaa website-keenna www.umphysicians.umn.edu.

WIXII WARAR DHEERAAD AH AMA SOO WARGELINTA WIXII DHIBAATO AH

Haddii aad dooneysid warar dheeraad ah oo ku saabsan ku dhaqankeenna waxa qofka u gaarka ah, aad qabtid su'aalo, wel wel, ama aad rumeysan tahay inaan meel ka dhac ku sameynay xuquuqdaada waxa kuu gaarka ah, fadlan la xiriir:

University of Minnesota Physicians
Privacy Administration
Suite 300, 720 Washington Avenue SE
Minneapolis, MN 55414
612-884-0600

Waxaad sidoo kale dacwad qoraal ah u soo gudbin kartaa Waaxda Adeegyada Aadanaha iyo Caafimaadka ee U.S. Waxaan ku siin doonnaa cinwaanka makaad naga codsatid. Waxaan taageereynaa xuquuqdaada si loo dhowro khaas ahaanta wararka caafimaadkaaga. Sina uma aarsan doonno haddii aad dooratid inaad dacwad qoratid.